



COVID-19: Xeerarka cusub ee dadka guriga wada degan iyo xiriirada isu dhow ee NSW

Haddii aad tahay xubin qoyska mid ah ama xirriir isu dhow oo aadan lahayn wax astaamo COVID-19 ah, uma baahnid inaad is gooni yeeshid laakiinse waa inaad raacdaa awaamiirta NSW Health:

- Ha booqan goobaha khatartoodu koreyso sida isbitaalada iyo tahsiilaadka daryeelka dadka da'da ah
- Wax ku barro ama ku shaqee guriga markii suurtagal ah. Waxaad uga baahan tahay ogolaansho loo shaqeeyahaaga ama tahsiilaadka waxbarashada haddii aad u baahan tahay inaad aado shaqo ama dugsi
- Ku xiro maaski gudaha haddii aad jirtid 12 sanno wixii ka weyn. Uma baahnid inaad ku xirato maaski gurigaaga gudahiisa
- Iska dhowr isu imaatinka balaaran ama ay ku badan yihiin dadkaadan la noolayn. Haddii aad dooneysid inaad tagto, samee baaritaanka degdega ah ee antigen ka hor intaadan degin

Raac xeerarka ilaa 7 maalmood laga bilaabo wakhtigii ugu danbeeyey in qof ka tirsan qoyskaagu laga helay xannuunka COVID-19 oo uu bosatiif noqday.

Haddii aad leedahay ama yeelato astaamaha, waa inaad is gooni yeeshaa oo aad iska baartaa COVID-19. Raac tallada NSW Health haddii natiijada baaritaankaagu ay bosatiif noqoto.

Haddii natiijada baaritaankaagu ay negative noqoto, guriga joog ilaa aadan ka yeelan wax astaamo ah.

Booqo www.nsw.gov.au/covid-19/management/household-contacts wixii macluumaad dheeraad ah.